

Safarada Qaxootiga

Tartanka qorista laga bilaabo 15 Janaayo illaa 15 Maajo 2021

Miyaad u timid Finland sida qaxooti ama magangalyo doon? Wax ka qor waaya aragnimadaada markii ay aheyd inaad ka soo qaxdid wadankaaga hooyo. Sannadihii ugu dambeeyay, safarada qaxootiga iyo magangalya doonada ku socdo Yurub ayaa marwalba ku jiray warbaahinta, laakin ma jirin in qaxooti badan ay u suurtoogasho inay sheegaan taariiqdooda gaarka ah. Waxaan rabnaa inaan aruurino oo aan keydino taariiqaha si aan markaas aanan loo iloobin.

Waxaan jeclaan laheyn inaan kaa maqalno taariiqo dadka ku soo jiray safarka qaxootiga ee dadka kala duwan iyo muddooyin waqtiyo kala duwan. Safarkaaga waxaa lagaa yaabaa inuu qaatay saacado yar ama sannooyin badan – waan soo dhaweyneynaa nooc walba oo taariiqo ah. Waxaad ku qori kartaa taariiqahaaga gaarka ah luuqadaada.

Su'aalaha xiggo ayaa kugu caawin karo nidaamka qorista:

- Goorma ayaad timid Finland? Imisa sanno ayaad jirtay?
- Goorma ayaad bilowday safarkaaga, iyo waxa ay aheyd daruufahaaga markii aad soo baxday? Ma waxay aheyd inaad degdeg ku soo baxdid, ama waad haysatay waqti aad ku qorsheysid safarkaaga? Maxaad la soo baxday markii aad soo baxday? Ma dad kale ayaad la soo safartay? Waqtigee maalinta ah iyo sannadka ayay aheyd markii aad ka soo baxday?
- See ahaa dareenkaagu iyo fikradahaaga markii aad ka soo tagtay wadankaaga?
- Goorma ayaad ogaatay inaad ku dambeyneysid Finland? Aragtiyo noocee, flashooyin ama warbixin ayaad ka haysay Finland?
- Wadadee ayuu safarkaaga ahaa? Gaadiid noocee ayaa u isticmaashay safarkaaga? Dad noocee ah ayaad la kulantay, ama xiriirto noocee ayaad sameysay inta safarkaaga aad ku jirtay?
- Intee ayuu qaatay safarkaaga? Miyay jiraan wax wajiyo ah, xaalado, meelo ama waaya aragnimo ee aad si cad u xasuusatid gaar ahaan?
- Xasuusyo noocee ah ayaad ka haysaa imaanshahaaga Finland?
- Sidee ayuu kuu saameeyay waaya aragnimada safarka adiga iyo noloshada?
- Maxaad u tixgelineysaa wadankaaga maanta?

Aruurinta waxaa diyaariyay Finnish Literature Society (SKS) iyo mashruuca *Safarada Qaxootiga: Sheekooyinka Dhaqaaqyada Qasabka ah* (Jaamacada Oulu) oo ay maalgelisay Akadheemiyada Finland.

SKS ayaa aruuriso, dhowrto, oo sameyso dhaxalka dhaqanka kala duwan ee la heli karo, oo waxaan jeclaan laheyn inaan ku darno taariiqahaaga aruurinadeena. Xog dheeri ah ka aqri SKS (www.finlit.fi) oo fadlan haka labalabayn inaad nala soo xiriirtid haddii aad wax su'aalo ah qabtid: arkisto@finlit.fi

Abaalmarinta guud ee tartanka qorista waa EUR 500. Intaas waxaa dheer, waxaa jiro saddex abaalmarinood ee aqoonsiga gaarka oo ah EUR 200 midkiiba. Guuleystayaasha waa lala soo xiriirayaa, natiijooyinkana waxaa lagu dhawaaqayaa deyrta 2021.

Tilmaamaha ka jawaabida:

Fadlan ku qor luuqadaada iyo dooqaaga. Baaxada qoraalka lama xadidin. Waxaan sidoo kale ogolaanaa sawirada, duubitaanada, xasuusyada hore, iyo wareysiyada. Fadlan kaliya soo dir qoraalka haddii aad leedahay xaquuqda iyo/ama ogolaanshaha lagu soo dirayo qoraal noocaas ah. Haddii aad ku soo dirtid taaridaada boosto ahaan am lifaaqa i-meelka, fadlan sheeg magacaaga ama magaca qoraaga, sharaxaadaha xiriirka, taariiqda dhalashada, iyo shaqada. Intaas waxaa dheer, ku dar ogolaanshahaaga keydkaaga qoraalada ee keydka SKS ee ka hooseeyo magacaaga ama magaca qoraaga iyo ogolaanshahaaga ee isticmaalkooda sida waafaqsan sharciyada keydka.

Fadlan aqri tilmaamaha maamulayo aarurinta qoraalka ee keydka SKS ee www.finlit.fi/luovutus_ja_keruuohjeet.

Fadlan gudbi qoraalkaaga xiliga 15 Maajo 2021

- dhinaca foomka onleenka www.finlit.fi/pakolaismatkat ama www.finlit.fi/en/refugeejourneys
- dhinaca boostada ee ciwaanka xiggo: Finnish Literature Society, Archives, PO Box 259, FI-00171 Helsinki, Finland. Fadlan calaamey bashqada ee "Pakolaismatkat".